diskrimineringsombudsmannen

Wakiilka takooridda – DO

Wakiilka xagga takoorku (DO) waa hey'ad dowladeed oo ka shaqeysa sidii loo heli lahaa bulsho aan takooridi ka dhex jirin. Waxaannu qabannaa hawl ay xukuumadda iyo baarlamaanka Swiidhan noo xil saareen. Waxaannu ilaalineynaa in la raaco xeerarka takooridda iyo xeerarka waaliddiinta, shaqadeynana waxaa xakameynaya xeerka ku aaddan wakiilka takooridda.

Ula jeeddada shaqadeennu waa bulsho isku xuquuq iyo fursado ahaanshada dadka la ixtiraamayo – iyadoon la eegeynin jinsi, aqoonsi iyo tacbiir jinsi ahaaneed, ka tirsanaasho qolo ahaaneed, diin ama wax kale oo la aaminsanyahay, naafanimo, dabci galmo la xiriira ama da'.

Waa maxay takoorid?

Swiidhan waxaa ka jira xeer takoorid oo mamnuucaya takooridda. Takoorid waxay ka dhigantahay in qof si xun loola dhaqmo marka cid kale la barbar dhigo. Laakiin marka xeerarka macnohooda la eego caddaalad darro ula dhaqmid kasta maaha takoorid.

Marka si dhib yar loo dhaho waxaa la oran karaa qeexidda xeerka ee takooriddu wuxuu ka koobanyahay afar shuruudood. Si dhacdo loogu qiimeyn karo in ay takoorid tahay waa in dhammaan shuruudaha afarta ah ay buuxsamaan.

1. Waa in ay ku saabsanaataa dhacdo ama xaalad qof lagu dulminayo ama sharafta looga ridayo.
2. Dulminta ama sharaf rididdu waa in ay la xiriirto mid ama dhawr ka mid ah aasaasyada takooridda (tusaale ahaan jinsi ama da').
3. Dhacdadu waxay ku saabsanaan kartaa wax ka mid ah lixda qaab ee takooridda ee xeerka ku jira (tusaale ahaan takoorid toos ah ama silcin).
4. Dhacdadu waa in ay ka dhacday mid ka mid ah aagagga bulshada ee uu xeerku khuseeyo (tusaale ahaan nolosha shaqada ama suuqa deegaanka).

Xitaa haddii shuruudaha oo dhan ay buuxaan ma hubna in dhacdada loo arkayo in ay takoorid tahay. Mararka qaarkood waxaa jira xeerar kale iyo shuruuc waxa saameyneysa. Tusaale ahaan haddii uu canug 18 ka yar-yahay aan khamri lagu siin maqaayad, looma arkayo taas in ay tahay takoorid xagga da'da ah, maxaa yeelay waxaa jira xeer kale, xeerka khamriga, oo maqaayadaha ka mamnuucaya in ay dhallinyarada 18 sano ka yar khamri siiyaan. Waxaa sidoo kale jiri kara waxyaabo kale oo keenaya in aan dhacdo takoorid lagu qiimeyn. Mar walba waa in xaalad kastaba kaligeed qiimeyn loogu sameeyo.

1. Waa in ay ku saabsanaataa dhacdo qof looga eexanayo ama sharafta looga ridayo

Ka eexasho waxay ka dhigantahay in qof la dhigayo meel ka liidata kuwa kale ama uu waayayo wax wanaajin ah, wax faa'iido u ah ama adeeg. Waxay tusaale ahaan ku saabsanaan kartaa in aan qof loo wicin wareysi shaqo, aan loo oggolaan in uu aado waxbarasho, in uu dukaan ka adeegto, in aan maqaayad loo sii deyn ama in aan loo oggolaan in uu kireysto gaari ama deegaan.

2. Ka eexashada ama sharaf rididdu waa in ay la xiriirto mid ama dhawr ka mid ah waxyaabaha takooridda gundhigga u ah

Si dhacdo loogu arko in ay takoorid tahay waa in ay sidoo kale xiriir la lahaataa mid ama dhowr ka mid ah waxa loogu yeero aasaasyada takooridda. Waxa sida sharciga ku cad jira toddoba aasaas oo takoorid:

- jinsi
- aqoonsi jinsi ahaaneed ama tacbiir jinsi ahaaneed
- ka tirsanaasho qolanimo
- diin ama wax kale oo la aaminsanyahay
- cuuryaannimo
- dabci xagga galmada la xiriira
- da'.

3. Dhacdadu waa in ay ku saabsanaataa wax ka mid ah lixda qaab ee takooridda ee xeerka ku jira

Sida sharciga ku cad waxaa jira lix qaab oo leysu takooro:

- takoorid toos ah
- takoorid aan toos ahayn
- helitaan xumo
- silcin
- dhibaateyn xagga galmada la xiriirta
- tilmaamo in wax la takooro ah.

Takoorid toos ah

Takoorid toos ah waa marka qof loola macaamilayo si ka xun sida dadka kale ee ku jira xaaladaha xaaladdiisa la barbar dhigi karo, uuna jiryo xiriir kala dhexeeya aasaas takoorid. Tusaale ahaan haddii shaqa bixiye u arko shaqa doon in uu leeyahay magac ajnabi oo aan caadi ahayn, sidaas darteedna uu doorto in uusan qofka wareysi ugu yeerin.

Takoorid aan toos ahayn

Takoorid aan toos ahayn waa marka uu jiro sharci u muuqda in uu dhexdhexaad yahay laakiin si gaar ah dad uga eexanaya si la xiriirta aasaasyada takooridda. Tusaale ahaan haddii shaqo bixiye uu si aan sabab lahayn shardi uga dhigayo in leysin gaari wadid la heysto, taasoo takoori karta dadka naafada ah.

Helitaan karid la'aan

Helitaan karid la'aan waa marka meesha shaqadu aysan qaadeynin tallaabo macquul ah si qofka naafada ahi uu hawsha uga qey qaadan karyo. Waxaa jira oo keliya shuruud ku aaddan tallaabooyin caqli gal ah. In tallaab ay macquul tahay iyo in kale, waxay tusaale ahaan ku xirantahay in ay shaqadu leedahay duruufaha dhaqaale iyo farsamo ee loo baahanyahay si tallaabooyinka loo qaado. Laakiin xeerku wuxuu sidoo kale tix gelin siinayaa haddii ay arrintu ku saabsantahay xiriir waqti gaaban ah ama xiriir waqti dheer ah, tusaale ahaan haddii ay ku saabsantahay booqasho hal mar ah oo dukaan ama haddii ay ku saabsantahay shaqaaleysiin ama waxbarasho waqti dheer ah.

Marka laga hadlayo helitaan karidda dadka naafada ah waxaa xitaa jira xeerar kale oo fara badan oo wax saameynaya (tusaale ahaan xeerka bey'ada shaqada iyo xeerka baayactamidda furan). Haddii si waafaqsan wax ka mid ah xeerarkaas ay urur uga ag jirto helitaan karid la'aan, waxaa taas loo arki karaa takoorid, waxaana sidaas darteed loo ashtakoon karaa DO.

Silcin iyo dhibaateyn xagga galmada la xiriirta

Silcintu waa falal meel uga dhacaya qofka sharaftiisa, lana xiriira mid ama dhawr ka mid ah aasaasyada takooridda. Waxay ku saabsanaan kartaa faallooyin, baaqyo jir ahaaneed ama in qofka ka qeyb galka loo diido.

Tusaale waxaa silcin u noqon kara macallin quursanaya ardayad iyadoo ay sababtu tahay in ay khimaar heysato ama gacanhaye xafiiska shaqada (arbetsförmedlingen) ah oo qof ka dhigaya wax lagu qoslo iyadoo ay sababtu tahay in uu qaniis yahay.

Dhibaateyn xagga galmada la xiriirta waxaa loola jeedaa dhaqan qaab galmo la xiriira oo qofka loo geystay uusan dooneynin. Waxay tusaale ahaan noqon kartaa in cidi ay cid taataabsato, ay bixiso ammaan, casuumaad ama hadallo maldahan oo aan la soo dhaweyneyn.

Tilmaamo in wax la takooro ah

Tilmaam in wax la takooro ah waa marka uu qofi awaamir ama tilmaamooyin ku siinayo qof xaalad ku xirnaasho ku sugan, tusaale ahaan shaqaale, in uu cid takooro.



4. Dhacdadu waa in ay ka dhacday mid ka mid ah aagagga bulshada ee uu xeerku khuseeyo

Mamnuucidda takooriddu waxay ka shaqeyneysaa aagag fara badan oo bulshada ah, tusaale ahaan nolosha shaqada, waxbarasho, xiriirin shaqo, iibinta badeecooyinka iyo adeegyada, daryeel bukaan, adeeg bulsho, ceymis bulsho (socialtjänst) (socialförsäkring) iyo taageero waxbarasho (studiestöd) iyo wax kaloo badan.

Xeerka takooriddu meel kasta kama shaqeynayo

Xeerka takooriddu shaqo kuma laha waxa laba qofood oo shacab ah ka dhex dhaca, tusaale ahaan sida deriska ama qaraabadu ay isula dhaqmayaan. Sidoo kale mamnuucidda takooridda sooma gelayaan waxyaabaha ay ka koobanyihiin xayeesiintu, tv, raadiyaha, warbaahinta bulshada iyo wargeysyada. Aagaggaas laakiin waxaa ka jira xeerar kale iyo sharciyo xudduud u sameynaya waxa la oggolyahay iyo waxa aan la oggoleyn.

Fasaxa waalidka in qofka lagu takooro waa mamnuuc

Shaqaale ama shaqo bixiye ku jira fasax waalid, geli doona ama ahaa fasax waxaa laga ilaalinayaa in shaqa bixiyuhu uu takooro. Ilaalinta xagga takooriddu waxay xitaa khuseysaa marka uu qofi guriga joogo si uu u daryeelo carruur xanuunsan. Tusaale waxaa takoorid ah in aan qofka la shaqaaleysiin, in la geeyo meel shaqadeedu xuntahay ama mushaarkiisu si aan fiicneyn uu u kordhayo.

Tallaabooyin firfircoon oo ku aaddan ka hor tegidda takooridda

Xeerka takooriddu wuxuu ka koobanyahay takoorid mamnuucid ku aaddan qofka shakhsiga ah laakin sharcigu wuxuu sidoo kale shardinayaa in shaqa bixiyaha iyo abaabulaha waxbarashadu ay qaadaan waxa loogu yeero tallaabooyin firfircoon. Waxay si ahaan ku saabsanyihiin in laga hor tago in qof la takooro ama si kale uu fursado kuwa kale ka xuxun uga helo goobta shaqada, si ahaanna in laxoojiyo isku xuquuq fursado ahaanshada goobta shaqada - iyadoon la eegeynin aasaasyada takooridda. Barteenna intarneetka waxaa ku jira macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan sida tallaabooyin firfircoon loo qaadi karo.

Ma la kulantay takoorid?

Adiga naftirkaaga ama cid kale ma laga eexday ama la sharaf riday iyadoo ay sababtu tahay jinsi, aqoonsi ama tacbiir jinsi ahaaneed, ka tirsanaasho qolonimo, diin, naafanimo, dabci galmo la xiriira ama da'? Markaas arrintu wey ku saabsanaan kartaa takoorid. Waxaad taas uga ashtakoon kartaa DO ama xafiis takooridda la dagaallama (antidiskrimineringsbyrå). Sidoo kale waad ka ashtakoon kartaa haddii shaqa bixiyahaagu si la xiriirta fasax waalidnimo uu kuu takooray.

Haddii aad urur shaqaale xubin ka tahay, laguuguna takooray shaqada waxaad marka hore la xiriireysaa ururkaaga shaqaalaha.

Barteenna intarneetka ayaad akhrisan kartaa wax dheeraad ah oo ku aaddan takoorid, sida loo sameynayo ashtakeyn iyo halka aad la xiriiri kartid. Waxaad xitaa nala soo xiriiri kartaa haddii aad qabtid su'aalo ku aaddan xeerarka takooridda, mamnuucidda ka eexashada waaliddiinta fasaxa waalidka ku jira ama xeerarka kale ee taabanaya takooridda.

Maxay DO ku sameyneysaa ashtakooyinka takooridda ku aaddan?

DO waxay qabaneysaa ashtakooyinka takooridda ee aannu siyaabo kala duduwan ugu isticmaaleyno shaqadeenna xoojinta. Waxaannu ashtakooyinka ka soo saareynaa waxyaabo la lafa guray oo aannu si wadajir ah ula isticmaaleyno cilmi baarisyada iyo wada xaajoodyada bulshada rayidka ah si aannu wax ugu ifinno una saameyno go'aan qaatayaasha.

Ashtakooyinku waxay sidoo kale keeni karaan in aannu hubsiino sameyno. Waxaa sanadkii na soo gaara ku dhawaad 2000 oo ashtako, ku dhawaad 200 oo ka mid ahna waxay keenaan hubsiimo la sameeyo. Hubsiino waxay ka dhigantahay in aannu baaritaan sameyneyno si aannu u ogaanno in waxa laga soo ashtakooday ay xeerka takooridda la soconayaan. Tusaale ahaan waxaannu baari karnaa xeerarka ama qaabka shaqada ee shaqa bixiyaha, isbitaalka ama guri kireeyaha ee takoorid sabab u noqon kara.

Hubsiimadeennu waxay keeni kartaa go'aan leh qiimeyn, mararka qaarkoodna waxaannu xitaa qori karnaa talooyin ku aaddan in shaqa bixiye, isbitaal ama guri kireeye ay beddelaan xeerarkooda ama qaabkooda shaqo si uu takoorku u istaago. Go'aankeennu maaha mid sharci ahaan wax xiraya laakiin kuwa aannu baarno badanaa talooyinkeenna wey raacaan.

Shaqadeenna waxaannu xitaa in yar oo dhacdooyinka ka mid ah sanadkii maxkamad ula kornaa (ku dhawaan 1 boqolkiiba oo ka mid ah dhammaan ashtakooyinka). Kiiska waxaa wadaya gar yaqaannada DO-ga, waxaana go'aan ka gaareysa maxkamadda.

Wakiilka takooridda (DO)
www.do.se
Box 4057, 169 04 Solna
Taleefan 08-120 20700
e-mail do@do.se

Detta är en översättning till somaliska av DO:s informationsblad ”Diskrimineringsombudsmannen (DO)”.